

Sinaanta iyo Cadaalada



Ciladaha

Oregon waxay caan ku tahay taariikhda muddada fog ee balaaran ee saraynta dadka cadaanka ah. Waa gobalka keliya ee aan u ogolaan Ameerikaanka Madoowga ah inay dagaan gobalkaan sanadihii 1840aadkii. Sanadihii 1950aadkii, Oregon ayaa dabar-goysay 61 qabiil kadibna burisay heshiisyadii lala galay. Waxyeelada ay gaysteen tallaabooyinka iyo xeerarka kale ayaa ah kuwo abidkood jiraaya.

Waxyeelada isir nacaybka nidaamku abuurta waa mid cad oo socoto ilaa maanta. Cadaalad darooyinka ayaa wali abuuraaya khasaaroyin aan la aqbali karin oo ku dhacaaya dadka Madoowga ah, ee Dhulka u dhashay, Dadka aan cadaanka ahayn iyo dadka Hindi Ameerikaanka ah/Dhaladka Alaska ah (BIPOC-AI/AN). Isir nacaybka iyo sinaan la'aanta ayaa saamayno xun ku reebay caafimaadka saamayna ku yeeshay helitaanka guryo qiimo jaban, cunto nafaqo leh, shaqooyin iyo waxbarasho tayo leh.

Sinaanta isirka waxaa laga wadaa inaan isirka qofka mar danbe loo adeegsan karin in lagu cabiro natiijooyinka noloshu, iyo in natiijooyinka dhammaan dadka la wada hormariyo. Sinaantu waa inay noqotaa aasaaska sharci dejinta gobalka si dadka BIPOC-AI/AN ka ah ay uga helaan awood go'aan gaaris gobalkeena.

Xalalka

Istaraatiijiyado kor loogu qaadaayo sinnaanta dadka ayadoo la adeegsanaayo sharciga, qorshaynta iyo maalgashiga ayna ku jiraan:

- In tiir looga dhigo lana dhiso xalalka ay hogaamka u hayaan dadka BIPOC-AI/AN ka ah ee dhinacyada waxbarashada, cadaalada danbiyada, guryaha, adeegyada bulshada, caafimaadka dadwaynaha iyo daryeelka bulshada si xal loogu helo eexda iyo cadaalad darada ka jirta maamulka
- In isir nacaybka ka jira xarumaha maamulka la shaaciyo inuu yahay masiibo caafimaadka bulshada ku dhacaysa

Healthier Together Oregon (HTO, Hormarinta Wadarjirka ah ee Caafimaadka Oregon) waxay u taagan tahay dhisida aasaaska dhammaan wakaaladaha gobalka si wakaaladaha gobalku diirada u saaraan sinaanta isirka heer kastaba.

HTO waxay diirada saaraysaa xaqiijinta isla xisaabtanka dhaqan gelinta xeerarka kahortaga isir nacaybka iyo kahortaga dulmiga. Keliya marka diirada la saaraayo xalalka ay bulshadu hormuudka u tahay ayuu isbadal dhaqan-gal ah imaan karaa.



HTO: Qorshaha Dhisida Oregon intaan Ka fiican

Healthier Together Oregon (HTO) waa farsamo awood badan oo lagu hormarinaayo sinaanta dhammaan dadka Oregon. Ayadoo COVID-19 uu wax badan kala cadeeyay, maaha in qof kasta helay fursad iskumid ah oo uu ku noolaado nolol caafimaad leh. Dadka aan cadaanka ahayn, dadka danyarta ah, dadka ktirsan bulshada LGBTQ+ (qaniisiinta), dadka soo galootiga ah iyo qaxootiyaasha, dadka naafada ah iyo dadka ku nool deegaannada miyiga ah ee gobalka ayaa waajahaaya caqabado badan sabab la xariirta cadaalad daro ka jirta qaab dhismeedka bulsho iyo midka dhisme taasoo saamayn ku leh caafimaadka.

Sababa la xariirta in caafimaadka iyo fayaqabku ku tiirsan yihiin arimo kaladuwan, HTO ayaa dejisay taxaneyaal badan oo xeelado ah kuwaasoo, marka la xaliyo si guudna loo dhaqan gasho, hormarin muuqat ku samayn kara nolosha qof kasta oo gobalkaan dagan.

HTO waxay doonaysaa inay dejiso Qorsheyaasha Hormarinta Caafimaadka Bulshada iyo sidoo kale muhiimadaha wakaaladaha iyo ururada, barnaamijyada iyo maalgashiyada. Waxay doonaysaa iskaashato kaladuwan oo ka shaqeeya

laamaha kaladuwan oo wadaagaaya dedaal lagu dhaqan gelinaayo yoolalkaan waawayn. Waaxahaan waxaa kamid ah daryeelka caafimaadka, saraakiisha la doortay, loo shaqeeyaasha, tabarucaada, gaadiidka, isticmaalka dhulka iyo qorshaynta, caafimaadka gobalka, qabiilka iyo kan dadwaynaha ee maxaliga ah, cadaalada danbiyada iyo fulinta sharciga, ururada bulshada, ururada ku salaysan diinta, adeeg bixiyaasha guriyaynta iyo aadanaha iyo waxbarashada.



Nala samee Iskaashi

HTO waxay doonaysaa inay xariir la samayso qolyaha kale ee u taagan inay hormariyaan sinaanta ka jirta Oregon. Si aad u hesho xog dheeraad ah ama nagalaso xariir:



WEBSSETKA

healthiertogetheroregon.org



IIMEELKA

publichealth.policy@state.or.us



NOQO ISKAASHADE

healthiertogetheroregon.org/
potential-partner



YOUTUBE

bit.ly/3jvkuAE



Healthier Together Oregon

healthiertogetheroregon.org

Waa mashruuc ay fulinayso
Oregon Health Authority
(Maamulka Caafimaadka ee Oregon)